Branaamijka Xuquuqul Insaanka ee L&I

## Kor u qaadida helidda, Sinaata, iyo Ixtiraamka ee dhammaan macaamiisha L&I

Civil Rights Program (Branaamijka Xuquuqul Insaanka) wuxuu ku dadaalaa hubinta in L&I (Waaxda Shaqada iyo Warshadaha) ay hoggaansanaato sharciyda iyo xeerarka gobalka iyo federaalka ee la xiriira xuquuqul insaanka iyo takoorka lidka ku ah**asalka qaran**, **isirka**, **midabka**, **luuqada**, **jinsiga**, **jinsi ahaan**, **diinta**, **da'da**, **naafonimada**, iyo **kooxaha kale ee gaarka loo ilaaliyo**.

Iyada oo la adeegsanayo baaritaan, wax ka qabasho, iyo waxbarid dhexdhexaad ah, waxaanu kor u qaadnaa heerarka ugu sareeya ee sinaanta iyo sharafta adeegyada ay bixiyaan L&I iyo adeeg bixiyeyaasheeda mushaharka qaata.

L&I (Shaqada iyo Shaqaalaha) **lama** shaqayso Immigration and Naturalization Service, ma aqbalno adeeyada helitaanka luuqada, xataa iyaga oo bilaash ah, ee ay fidiyaan maamulka ciidanka laanta socdaalka ee federalku. Uma gudbin doono wax macmiilka ah macluumaadkiisa la xidhiidha laanta socdaalka dowlada federaalka ama booliska maamulka deegaanka; ujeedkeena waa inaan xaqiijino in dhammaan macaamiisheena ay heli karaan dhammaan barnaamijyadeena iyo adeegyadeena.

## Gudbi dacwada takoorka xuquuqul insaanka

Haddii aad aaminsan tahay inuu ku takooray shaqaale u shaqeeya L&I ama adeeg bixiye ay L&I mushahar siiso (dhakhtar, la-taliye xirfad, ama turjubaan tusaale ahaan), ka soo gudbi dacwada takoorka adiga oo isticmaalaya mid kamid ah hababkan soo socda:

- Buuxi Discrimination Complaint Form (Foomka Dacwada Takoorka Xuquuqul Insaanka) (F270-001-000) oo boostada ugu dir cinwaanka ku qoran qeybta kore ee foomka, ama iimayl ahaan ugu dir CivilRights@Lni.wa.gov.
- Naga soo wac lambarka **1-855-682-0778** ama iimay inoogu soo dir CivilRights@Lni.wa.gov.
- Booqo xafiiska L&I ee kuugu dhaw (waa Ingiriis kaliya).

Waxaan aqbalnaa dacwadaha iyo soo gudbinta hay'addaha madaxabanaan.

**Su'aalaha Ku Saabsan Barnaamijka Xuquuqul Insaanka iyo Dacwadaha Takoorka**

**Yaa gudbin karo dacwada takoorka?**

- Waxaan aqbalnaa dacwadaha uu soo gudbiyo qof kasta oo shaqo kala dhaxeysa ama adeeg ka hela L&I, tusaale:
    - Tababar shaqo
    - Qandaraaslayaasha
    - Shaqaalaha
    - Loo-shaqeeyeyaasha
    - Mulkiilayaasha guriga
    - Shaqaalaha dhaawaca noqday
    - Ganacsatada

Waxaan sidoo kale aqbalnaa dacwadaha iyo soo gudbinta hay'addaha madaxabanaan.

Goormee ayaan tixgeliyaa inaan soo gudbiyo dacwada takoorka?

- Waa inaad tixgeliso inaad soo gudbiso dacwada takoorka haddii:
    - Aad codsatay — balse aad aaminsan tahay **inaadan** ka helin — adeegyo laguugu siiyo luuqada aad rabto (oo ay ku jiraan adeegyada luuqada ishaarada) mid kasta oo kamid ah shaqaale u shaqeeya L&I ama adeeg bixiye ay L&I mushahar siiso,

      **iyo/ama**

    - Aad aamminsan tahay in shaqaale u shaqeeya L&I ama adeeg bixiye ay L&I mushahar siiso uu kaa reebay, uu kuu diiday inaad hesho, ama si gooni ah uu kuula dhaqmay sababo la xiriira asalkaaga qaran, isirkaaga, midabkaaga, luuqadaada, jinsiyadaada, jinsi ahaantaada, diintaada, da'daada, naafonimadaada, ama kooxo kale oo la ilaliyo aawadood.

Yaan ka gudbin karaa dacwada takoorka?

Dacwadaha takoorka waxaa laga gudbin karaa shaqaalaha u shaqeeya L&I ama adeeg bixiyeyaasha ay L&I mushahar siiso (tusaale ahaan, bixiyeyaasha caafimaadka, turjubaanada, khuburada xirfadaha).

Dacwadaha takoorka noocyadee ayay L&I aqbashaa?

- Dacwadaha takoorka iyo/ama diidmada adeeg helidda macnaha leh ee ku saleysan:
  - Asalka qaran
  - Isirka
  - Midabka
  - Luuqada
  - Jinsiga
  - Jinsi ahaan
  - Diinta
  - Da'da
  - Naafonimada
  - Dadka kale ee gaarka loo ilaaliyo

Dacwadaha takoorka noocyadee ayay L&I aqbashaa?

- Dacwadaha takoorka ee laga soo gudbiyo loo-shaqeeyayaasha.

Fadlan la xiriir Human Rights Commission (Guddiga Xuquuqul Insaanka) si aad dacwad takoor uga gudbiso loo-shaqeeyahaaga.

Waa maxay sharciyada xadidaada ee ku saabsan gudbinta dacwada takoorka?

- Waxaad heysataa ilaa 180 maalmood laga soo bilaabo maalinta adeegyada laguu diiday iyo/ama takoorka uu dhacay si aad dacwad u gudbiso.

Haddii aanan awood u lahayn inaan baarno dacwadaada, waxaan kuu diri karnaa hay'adda habboon.

Maxaa dhacaya inta lagu jiro baaritaanka dacwada takoorka? Muddo intee la'eg ayay qaadaneysaa?

- Waxaan ognahay inay u baahan tahay geesinimo wayn in dacwad la gudbiyo. Barnaamijka Xuquuqul Insaanka wuxuu ka madaxbanaan yahay barnaamijyada kale ee L&I wuxuuna qabtaa baaritaano dhameystiran oo dhexdhexaad ah.

Dacwad baaraha laguu soo xilsaaray ayaa kaa dalban doona inuu kuula kulmo fool ka fool ama taleefonka kaala hadlo si uu xog uga helo waxyaabaha dhacday.

Baaritaanada sida caadiga ah waxay qaataan ilaa iyo 90 maalmood si loo dhameystiro, balse kiisaska qaar waxay qaataan muddo intaas ka dheer si loo xaliyo.

Miyaa la iiga baahan yahay inaan foom buuxiyo haddii aan rabo inaan gudbiyo dacwada takoorka?

- Maya, foomka waa ikhtiyaar. Dacwada takoorka waxaa **toos** loogu gudbin karaa Barnaaminka Xuquuqul Insaanka iyada oo la wacayo, iimayl loo dirayo, ama toos loogu tagayo.

Miyay jiraan qaabab kale oo lagu gudbin karo dacwada takoorka?

- U.S. Department of Justice (Waaxda Cadaalada ee Mareykanka) (**1-800-514-0301**)
- U.S. Department of Labor (Waaxda Shaqaalaha ee Maraykanka) (**202-693-6500**)
- Washington State Office of the Attorney General (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobalka Washington) (**1-800-551-4636**)
- Washington State Human Rights Commission (Gudiga Xuuquuqul Insaanka ee Gobalka Washington) (**1-800-233-3247**)

Waxaad u gudbin kartaa kooxahan dacwada takoorka ka hor, inta lagu jiro, ama ka dib baaritaanka L&I

Yaan u gudbin karaa dacwada takoorka ee ku saabsan loo-shaqeeyaheyga ama koox kale oo aan la xiriirin L&I?

- Waxaad u gudbin kartaa dacwada takoorka ee ku saabsan loo-shaqeeyahaaga ama koox kale:
  - Guddiga Xuquuqul Insaanka
  - Equal Employment Opportunity Commission (Guddiga Fursadaha Shaqada Siman)

Sidee ayay L&I ugu hogaansantaa shuruudaha Washington Employment Laws (Sharciga Shaqaalaha Washington)?

L&I heshiis kulama gasho oo kama aqbasho adeegyada luuqada, xataa isaga oo bilaash ah, wax kamid ha hay'adaha laanta socdaalka federalka.

Hay'ada laanta socdaalka federalku waxay ka dhigan tahay saraakiisha, shaqaalaha, ama dadka kale ka qaata mushaharka ama matala hay'ada U.S. Department of Homeland Security, laakiin kuma koobka hay'ada ka hoos shaqeeya (tusaale ahaan, Immigration & Customs Enforcement iyo Customs & Border Protection) iyo wixii wakiilo ama waaxo mustaqbalka ah ee ka masuulka ah hawlaha socdaalka.

Xageen ka heli karaa xog dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Xuquuqul Insaanka ee L&I?

Dib u eeg buug yaraheena macluumaadka Civil Rights Program at L&I (Barnaamijka Xuquuqul Insaanka ee L&I) (F270-006-000).

**La xiriir Barnaamijka Xuquuqul Insaanka**

- Iimeyl: CivilRights@Lni.wa.gov
- Lambarka bilaashka lagu waco: 1-855-682-0778